# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



## Afartan Sanadood

Waxa qoray: Edward Hughes


Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Lyn Doerksen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Markii Ilaah ka soo samata bixiyey reer Binu Israa'iil Masar, Muuse dadkii wuxuu ku hogaamiyey cibaado. Wuxuu sameeyey qasiidooyin Ilaah amaan. "Waxaan u gabyi doonaa Rabbiga amaanta guusahiisa." Ilaah wuxuu ka gabyaya dhamaan wax walba oo uu u sameeyey reer Binu Israa'iil.

ALALUYA
AMAANI HA
U AHAATO ILAAH!



Saddex cisho ka dib iyagoo haraad la ildaran ayay dadkii heleen hadho war ah oo aan ku haboonayn in la cabo biyahaa khadhaadh ee qudhmay.




Intii ay Ilaah baryi lahayeen ayay bilaabaeen cabasho dadkii.




Waxayn u muuqden dadkii
inay wax walba ka cabanayeen.
"Cunto Ayaan ku haysanay Masr, bankan sxaraha ah gaajaa inagu dilaysa." Bay ku gunuunaceen Galabtaa waxaa lagu soo daayay shimbiro digaag-duureed ah. Dadkiina si sahlan bay u soo qabqabsadeen.

Subaxdii dambe Ilaah wuxuu u soo diray kibistii Maanada. Waa nooc la mid kibista caadiga ah oo u dhadhanta sidii malab khafiid ah. Aroor walba kibista Maanada waxay iska ooli jirtay dibadda oo




laga guran jiray. Sidaa buuna Ilaah ku quudin jiray dadkiisa banka saxaraha ah dhexdiisa markay joogeen.

Wxayna aamineen Ilaah maalin walba inuu ssinayo cunta cusub.  Laaakiin qaar kale ayaa gurtay cunto ka badan intii loogu talay galay, xitaa inkasta Ilaah ku yidhi yeysan noqon in maalin ku filan in la qaato.



Waa hubaal inay ku filan tahay, Maanadii shalay waxaa ka buuxsamay cayayaan yaryar --- inta aan ka ahayn maalinta Sabtida. Maalintaa gaarka u ah maalinta toddobaad dadku way nastaan oo ay cunaan maanadii shalaytoole.



Ilaah wuu ilaaliyay Israa'iliyiintii intii ay joogeen banka saxaraha ah. Cunto iyo biyo ba wuu siiyey – wuuna ka difacay cadowyada.

Markii reer Camaalaq soo weerreen, wuu ku guuleeyey Israa'iliyiintii dagaladii ay la galeen intii uu usha Ilaah gacanta kor ugu hayay.





Ilaah Israa'iliyiintii wuxuu ku yidhi, "Haddii aaad addeecdaaa Codkayga waxaad noqon doontaa dadkayga gaarka ah." "Dhamaan waxa Ilaah yidhaahdo way ahaan doonaa." Muuse dadkii buu u sheegay. Waxay ula soo lugeeyeen buurtii Siinaay oo waxay ku sugeen Muuse intuu Ilaah kala soo kulmayay.



Muuse afartan cisho ayuu buurta la joogay Ilaah. Ilaah wuxuu u soo qoray tobanka amar oo ku kala qoran laba loox dhagax. Wuxuuna Muuse u soo sheegay sida uu doonayo inay u noolaadaan dadkiisa.

1. “Waa inaadan aniga mooyee Ilaahyo kale lahaan.”
2. “Waa inaadan samaysan ama u sujuudin sanam.”
3. “Waa inaadan magaca Rabbiga si beenbeen ugu hadal qaadin.”
4. “Xusuuso maalinta Sabtiga, inaad qudduus ka dhigto.”
5. “Maamuus Aabahaa iyo Hooyadaa”


6. "Waa inaaadan qudh goyn."

7. "Waa inaadan sineysan."

8. "Waa waxba xadin."

9. "Waa inaadan been sheegin."

10. "Waa inaadan damcin."




Intii Muuse Ilaah la joogay buurta Siinaay Israa'iliyiintii waxay sameeyaan wax xun oo aad u khalafsan. Waxay ku amreen Haaruun inuu sameeyo weyl dahab ah – oo ay caabudaan intii ay Ilaah caabudi lahaayeen. Ilaah aad buu ugu cadhooday. Sidaas oo kale Muusana.



Markii Muuse arkay weyshii dahabka ahayd oo dadkii u cayaarayaan, looxyadii dhagaxa ahaa baa kaga dhacay dhulka. Muusihii cadhaysanaa wuxuu jajabiyey sanamkii dahabka ahaa. Dadkii xunxumaa ee caabudayay waa la dilay.


Ilaah wuxuu ugu bedelay laba loox dhagaxeed.  Wuxuuna ku yidhi Muuse dhis macbud – teendho weyn oo u samee xeen daab ku wareegsan – meeshaa buuna Ilaah la joogayaa dadkiisa.  Halkaa bayna Ilaah ku caabudayaan Dauurtii tiirka ahayd iyo dabkii tiirka ahaa ayaa Ilaah tusi doona dadaka xaadirnimadiisa.



Markii ay u soo dhowaadeen Kancaan, Muuse wuxuu xushay laba iyo toban sahan ah inay soo arkaan dalkii Ilah kala ballamay dadka. Intii kale waxay isku raaceen inuu dhulka qurux badan yahay, laakiinse laba keliya, Yashuuca iyo Qaalib, waxay aaminsanayeen in la qabto dhulka caawimaadda Ilaah awgeed.




Tobankii sahmiyayaal way ka cabsadeen caasimadihii ad-adkaa iyo dadkii waaweynaa e dhulka joogay. “Dhulka ma qaadan karno,” ayay ku cabaadeen. Waxay illoobeen waxyaalihii



waaweynaa oo Ilaah u sameeyey inuu iyaga Masar ka soo furto.

Dadkii waxay raaceen tobankii sahmiyaaal ee rumaysad la'aanta ahaa. Waxayna ku gunuunaceen inay dib ugu laabtaan Masar intuu Muuse ku layn lahaa!



Ilaah wuu badbaadiyey Muuse noloshiisa. Deedna wuxuu dadkii ku yidhi, "Muddo afartan sanadood ah waxaa ku warwareegaysaan cidlada. Qaalib iyo Yashuuca, iyo caruurtiina ayaa gali doona kuna noolaan doona dhulkaa maadaama aad xaqirteen."



Afartan Sanadood

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Baxniintii 15 ilaa Tirintii 14

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

12

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16